

Taageerida waxqabadka bulshada qaxootiga

Qasnadda ama sanduuqa Bulshada Qaxootiga wuxuu taageeraa dadaallada iyo ururada waxtarka u ah bulshadaan Omaha. Waqtigaan, Ururka 'Omaha Community Foundation' waxay iskaashi la sameyneysaa guddi lataliyeyaal ah oo gacan ka geysta go'aannada maalgelinta, si kastaba ha noqotee, bilaha soo socda guddigaan wuxuu u gudbi doonaa dhammaan hoggaamiyayaasha kooxda hoggaamineysa, go'aan gaarista. Guddigu wuxuu ka koobnaan doonaa wakiillo ka socda dadweynaha qaxootiga ah kuwaas oo fahansan waxa maalgashigu ugu wax ku yeelan karo wax ka qabashada baahiyaha bulshada.

Mudnaanta maalgelinta waxaa ka mid ah, laakiin aan ku xaddidnayn:

- Xasiloona qoyska
- Waxbarashada iyo dhaqanka
- Taageerada dhalinyarada iyo marin u helka
- Caafimaadka jirka iyo maskaxda

Codsiyada muujinaya iskaashiga ka dhexeeya ururada badan ayaa lagu dhiirigelinayaa. Wakiilka qaxootiga (inta u dhexeysa macaamiisha la adeegsaday, maareynta, shaqaalaha, iyo xubnaha guddiga) waa la qaddariyo inta lagu gudajiro nidaamka go'aan qaadashada.

Faahfaahinta Codsiga

Illaa \$ 50,000 oo ah deeq-lacageedka ayaa lagu bixin doonaa wareegga deeqda. Codsiyada maalgelinta kama badan karto \$ 5,000. Celceliska deeqda la bixiyaa waa \$ 1,000 ilaa \$ 5,000.

Codsiyada waxaa loo shaqeeyaa sedexdii biloodba mar (Janaayo, Abriil, Luulyo, Oktoobar); waa la soo gudbin karaa sanadka oo dhan; iyo, waa in la soo gudbiyaa ugu dambeyn 11:59 PM taariikhaha soosocda Maarso 31, Juun 30, Sebtember 30, Diseembar 31.

Shuruudaha loo baahanyahay

Codsadeyaashu waa inay noqdaan hay'ad dowladeed, canshuur dhaaf looga dhaafay sida lagu qeexay Qaybta 501 (c) (3) ee Xeerka Canshuuraha Gudaha, AMA isagoo la shaqeynaya 501 (c) (3) wakiilka maaliyad kaasoo heli kara lacag isagoo ku matalaya.

Barnaamijyada wax soo saarka leh, waxqabadka, adeegyada, ama fikradaha kale ee gudaha ee kor ku xusan meelaha xooga lagu saaray ee loogu adeegayo Afrikaanka Mareykanka ee ku sugan Degmooyinka Douglas iyo Sarpy.

Kuwa helay deeqdii hore way codsan karaan mar labaad haddii warbixintoodii ugu dambaysay loo gudbiyo Omaha Community Foundation.

Xeerarka codsadeyaasha iyo wax qabadkooduba waa inay la jaanqaadaan qodobka soo socda ee takoor la'aanta:

Hey,ada codsaneeyso waa inaaysan sameeynin si sharci ah ama si sharci darro ah marka ay shaqaaleysinneyso dadka ama ay u adeegayan macaamisha takoorid kusaleeysan jinsi, qowmiyad, doorbid diimeed, da,da', (maskaxeed, shucuur, ama jireed] naafonimo, nooca galmada, aqoonsiga jinsiga, , milatariga, iyo ama jinsi.

Intaa waxaa sii dheer, ururradu waa in ay soo gudbiyaan sharciyada ama xeerarkooda ka hortagga midab-kala-sooca waqtiga codsashada.